

Sharciga lamba. 5 ee 28 Dicembar 1971.

Ku Fidinta Dalka oo dhan Canshuurta Diiwaangelinta iyo Canshuurta Rahanta, Canshuurta Dhaxalka, iyo canshuurta Qoraallada Guud ee Diiwaangalinta Baabuurta.

GUDDOOMIYAH A GOLAHA SARE KACAANKA

Marka uu dhagaystay Golaha Wasiirada Dawladda;
Marka uu arkay Oggolaashaha Golaha Sare Kacaanka;

WUXUU ANSIKIYAY

Xeerka soo socda:

Qod. 1 Ku Fidinta Dalka oo Dhan

Xeerarka soo socda ee ee canshuuraha waxaa lagu fidiyay Dalka oo dhan:

- i. Canshuurta Diiwaangelinta, canshuurta Rahanta ee ku xusan Xeerka 3 Julaay 1921 lamba. 1174 ee 11 Disembar 1938 lamba. 1454;
- ii. Canshuurta Dhaxalka ee ku xusan Xeerka 2 Oktobar 1922 lamba. 1674 iyo isbaddaladii ka dambeeyay;
- iii. Canshuuraha Qoraallada Guud ee Baabuurta ee ku xusan Xeerka 1 Janaayo 1960 lamba. 1.

Qod. 2 Wax ka Baddalka Canshuurta Dhaxalka

1. Canshuurta Dhaxalka ee ku xusan Xeerka 2 Oktoobar 1924 lamba. 1674, waxaa lagu dabbaqaya keliya hantida dhaxalka lagu kala wareegsanayo.
2. Hantida lagu kala wareegsanayo hibada waxaa la saarayaa canshuurta diiwaangalinta, ee la xariirta hantida ay kala wareegsanayaan dadka nool.
3. Qiimaha canshuurta dhaxalka sidaan ayaa loo baddalay:
 - i. Asalka, faraca iyo sayga/xaaska dhexdooda qim 2%
 - ii. qaraabada dhexdooda illaa darajada 4aad “ 4%
 - iii. qaraabada dhexdooda wixii ka sarreeya darajada 4aad “ 6%

Qod. 3 Muddada laga soo Bilaabayo iyo Laalidda

1. Xeerkaan waxa la dabbaqayaa laga soo bilaabo 1 Janaayo 1972;
 - i. Wixii ku saabsan dhaxalka, dhacday laga soo bilaabo 1 Janaayo 1972;
 - ii. Wixii ku saabsan dhimaashaha, dhacday laga soo bilaabo 1 Janaayo 1972;
2. Waxaa la laalay xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la jaan qaadi Karin xeerkaan.

Qod. 4

1. Xeerkana deg-deg ayuu dhaqangalayaa waana in laga faafinayaa Faafinta Rasmiga.
2. Xeerkana waxaa lagu biirinayaa Uruurinta Rasmiga ee Xeerarka iyo Dekeretoooyinka Jamhuuriyadda Demoqaraadiga Soomaalia.

3. Cid kasta waxaa ku waajiba in ay u hoggaansato ka xeer Dawladeed ahaan.
Muqdisho, 28 Disembar 1971.

Guddoomiyaha
Golaha Sare Kacaanka
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre